# Isticmaalada U Qalma -Aan U Qalmin

## Xannaanada Caruurta ee Minnesota

## Deeqda Soo noolaynta Xarunta

## Dib loo eegay Maarso 2023

**Yaraynta:  Sunta Asbestos-ka/Lead-ka/caarada(mold)/Radon-ka:**

- **HAA:** Khafiifinta/yaraynta rasaasta, caarada, asbestos-ka ama radon-ka. Rinjiyeynta rinjiga rasaasta ee dibadda ah ayaa loo oggol yahay in la yareeyo iyada oo lagu cadaynayo dukumintiga rasmiga ah ee ranjiga rasaasta; iibsashada qalabka wax sheegta; hagaajinta qulqulka si looga hortago / loo yareeyo caaryada; bedelida daaqadaha goobta daryeelka caruurta
- **MAYA:** Bedelidda dhammaan daaqadaha guriga ama dhismaha ama mashaariicda u baahan dayactir weyn. Ma jiraan qalab tijaabo ah

**U Hogaansanaanta ADA ee dhismayaasha**

- **HAA:** Kaabooyinka, baararka qabsashada ama u hoggaansanaanta kale ee gudaha ADA oo u baahan hadda liiska sugitaanka ee daryeelka caruura famillada; rinjiyeynta calaamadaha naafada/xariijimaha meelaha baabuurta la dhigto ee loo qoondeeyay
- **MAYA:**  U hogaansanaanta ADA ee dhismayaasha lagama maarmaanka aan u hayn barnaamijka xanaanada caruurta (qoysaska hadda ama kuwas liiska sugista kujira)

- **Qaboojiyaha:**
- **HAA:**
  - Iibka qaboojiyaha cusub ama dayactirka qalabka hadda - halbeega kaliya. Qiimasheegyadu waa inay caddeeyaan qiimaha iibka ee qalabka si ka duwan shuruudaha rakibaadda sida tuubbooyinka, hawo-mareenka, tubbada, agabka dheeraadka ah, iwm. waa qaab dhismeed oo aan u qalmin. Kharashka qalabku waxa uu xaq u leeyahay 100% qaab dhismeedkiisa oo dhamaystiran barnaamijka daryeelka caruurta; 50% goob la wadaago (guriga qoyska ama goobta ururka lala wadaago). Qaboojiyaha daaqada waa la ogolyahay in aan wax

isbedel dhisme ah ku samayn daaqada looma baahna. Halbeega qaboojiyaha la qaadi karo ayaa loo ogolyahay 50%.

- **MAYA:**
    - Khidmadaha shaqada/rakibaadda ama kharashka cusub/dheeraadka tubbada, hawo-mareenka, tuubooyinka, agabka dheeraadka ah, iwm.
    - Ma jiraan qaybo yar-yar sababtoo ah waxay u baahan yihiin dalool in laga gooyo darbiga si loo rakibo. Ma jiro wax kharash ah oo la xidhiidha hawo qaboojiye la qaadi karo.
    - Ma jiro dammaanad la dheereeyey ama khidmadaha qorshaha adeegga.

- **Sifey-yaasha Hawada:**

    - **HAA:** Qalabka sifaynta hawada, kuwa hawada uumiya, kuwa hawada qoyaanka kasaara (100% xaq u leh kaliya haddii lagu isticmaalo barnaamijka daryeelka carruurta, 50% waa u qalantaa haddii lagu isticmaalo goob la wadaago. Qaybaha la qaadi karo ee meelaha la wadaago waxay xaq u leeyihiin 50%).

- **Dhismayaasha ama Qalabka xoolaha:**

    - **MAYA:** guriga digaaga ama shay kasta oo khuseeya xoolaha/xayawaanada rabaayadda ah oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn sariiraha xayawaanka rabaayada ah, shabaqa eyga ama meelaha kale ee xayawaanka lagu hayo
- **Qalabka:**

    - **HAA:** Iibka ama dayactirka qalabka - 100% haddii loo isticmaalo oo keliya barnaamijka daryeelka caruurta; 50% haddii qoysku ama urur kale u isticmaalo goob la wadaago. Aalabaha xaqa u leh waxaa ka mid ah:
        - Qaboojiyaha, qaboojiyaha zaaidk ah, shooladda, weel dhaqda, microwave-ka, qaboojiyaha biyaha, dhar dhaqaha, qalajiyaha,

hawa uumiyaha-ga, qoyaan nadiifiyaha hawada, nadiifiyaha (sida Zono) iyo/ama rakibidda qalabkan.
    - Qiimaha halbeegga kaliya ee foornada, qaboojiyaha, kuleyliyaha biyaha, jilciyaasha biyaha, bamka kulaylka, kuleyliyaha gaaska, Bipolar-ionizationka reverse osmosis-ka iyo qalabka la midka ah ee la xiriira biyaha, kululaynta ama qaboojinta. Qiimaha cutubyadan waa in si gooni ah loogu taxay qiima-sheegayaasha kale oo ay ku jiraan qaybo dheeraad ah, rakibid/shaqo.
- **MAYA:**
    - Qalab cusub/dheeraad ah, dhuumooyinka, tubooyinka, hawo-qaadaha, iyo kharashka shaqada/ rakibida qalabka la xidhiidha kulaylinta, qaboojinta iyo biyaha. Xigasho kasta oo kuleyl/qaboojin/biyo ah oo aan kala sooceynin qiimaha qalabka si gooni gooni ah qaybaha/qalabka dheeraadka ah, rakibidda iyo kharashyada kale ee la xiriira waa mid aan xaq u lahayn.
    - Ma jiraan qalab yar, guri ama jikada oo aan kor ku xusnayn, sida nadiifiyaha vacoom-ka, meelaha qashinka ama foornooyinka rootiga.
    - Ma jiro dammaanad la dheereeyey ama khidmadaha qorshaha adeegga.

**<u>LAAMI:</u>**( Qiimo-sheegayaasha waa in ay aad u caddaadaan qiimaha buubuuxinta dildilaaca ama godadka iyo in si gooni ah loo jejebiyo nooc kasta oo dib-u-malaasid maadaama dib-u-malaasidu aanay u qalmin. Ku dar sawirro si aad u muujiso)

- **HAA:**
    - Buuxi dildilaacyo yar yar iyo/ama godadka meelaha baabuurta la dhigto, wadada laamiga ama barxada dambe haddii ay keenayso khatar caafimaad/ammaan ah (sawir cadeynaya dayactirka loo baahan yahay ayaa codsiga dhexdiisa looga baahan yahay)
    - Dib-u-calaamaynta calaamdaha naafada ee goobta baabuurta la dhigto si loogu hoggaansamo ADA

        - Ku daridda meel yar oo lagu kala wareego oo ku taal jidka loo maro ujeedooyin badbaado oo aan ka weynayn goobta baarkinka caadiga ah (10x12) kaas oo baabuurtu dib ugu noqon karaan si ay u soo kala wareegaan. U qalma kaliya marka loo baahdo ama lagu taliyay shati siinta meesha ay ku taal wadada mashquulka ah (sida wadada weyn) – caddayn ayaa loo baahan yahay
    - **MAYA:**
        - Ka saaridda iyo/ama qaadista laamiga
        - Goynta qaybo ka mid ah laamiga si loo dayactiro
        - Dib-u-shamiitaynta, dib-u-sagxadaynta, daboolidda ama hagaajinta qaybo waaweyn oo ah baarkinka ama wadada.
        - Dib u rinjiyeynta xariijimaha baarkinka oo dhan
        - Ku darista meel lagu kala wareego oo u baahan/tallooyinka shati bixiyaha aan la diiwaangelin.
        - Ku daridda waddo wareeg ah, waddo balaarinta ama meel kasta oo lagu soo kala wareego oo ka weyn 10x12 bannaan ama sagxad kasta oo shamiiteysan/xitaa haddii meel lagu soo kala wareego uu ku taliyay shati bixiye.
        - Ku-daridda ama hagaajinta biya mareenada laamiga ka hooseeya
        - Ku-daridda meesha yar (apron) ee u dhexeysa waddada iyo garaashka ama ku-daridda apron-ka waddada.

- **<u>Saqafka sare ee Xafiiska:</u>**
    - **HAA:** Dib-u-dayactirka yar ee saqafka sare ee booska xafiiska ee loogu talagalay barnaamijka daryeelka caruurta
    - **MAYA:** Dib-u-dayactirka qaab-dhismeedka oo ay ku jiraan dahaarridda/hawo-qaadis usameynta gidaarka ama saqafka
    - **<u>Dhamaystirka/Dib-u-dayactirka Qaybta Hoose</u>**

   - **HAA:** Qayb ka mid ah mashruuca guud (tusaale ahaan, samaynta/safiito saarista/ rinjiyeynta ama sagxadaynta ama ku darista jikada ama musqusha - maaha dhammaan.)
   - **MAYA:** Dhamaystirka/dib u-dayactirka qaybta hoose. Ma jiro shaqo shamiito/bulukeeti ama fogeynta darbiyada culayska haya.

**<u>Musqulaha:</u>**

- **HAA:** Ku darista musqul gaar ah oo lagu xanaaneeyo caruurta ama dayactirka/dib u cusboonaysiinta alaabta haleysan ee loo isticmaalo barnaamijka daryeelka caruurta oo ay ku jiraan musqusha(laha), meesha gacmaha lagu dhaqo, iyo meesha gacmaha lagu dhaqdao ee qaanada wadata, qasabad, sagxadda, saqafka, albaabka, gacanka am qalabka caadiga ah
- **MAYA:** Muraayadaha, qubeyska, meelaha qubayska, tubbada, xidhmooyinka tubbada, beddelka qalabka iftiinka ee qaabka, hagaajinta si loo qurxiyo, ama ujeedooyinka bilicda (waxyeellada waa in la qoraa ama lacadeeyaa)

**<u>Qolka nasashada/Goobta Kulanka:</u>**

- **HAA:** Samee meel kulan ama qolka nasashada ee xarunta daryeelka caruurta oo ay ku jiraan miiska qadada ama miiska kulanka, kuraasta ganacsiga
- **MAYA:** Qalabka guryaha ee dadka waaweynh ee aan si gaar ah loo ogolayn, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn fadhiga, kuraasta jacaylka, kuraasta waaweyn, kuraasta horay iyo gadaal u lulma, kuraasta luga-fitsidga leh, miisaska munaasabadaha, mashiinnada, miisaska marmar, alaabta guriga lagu qurxiyo, sariiraha, armajooyinka.

**<u>Business, Program, Other Expenses:</u>**

- **MAYA:**

- Naqshadeeyaha, Xeer Ilaaliyaha, Xisaabiyaha, Xayeysiinta, Sahanka Dhulka
- Kharashyada ganacsiga - khidmadaha canshuuraha, tababarka, shaqaaleysiinta, shati siinta

**Ganacsiga, Barnaamijka, Kharashyada Kale (sii socota):**

- Adeegyada nadaafadda (dhammaan noocyada, ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn nadiifinta guriga, qalabka, iyo nadiifinta dhuumaha)
- Manhaj, Tababar
- Qorista deeqda ama kharashka maamulka
- Cuntada, kaaraarka hadyada
- Daryeelka cawska ama qalabka ama adeegyada baraf xaaqidda
- Barashada iyo ciyaarta, alaabta lagu ciyaaro
- Taageerada Hawlgelinta
- Personal Care supplies of any type
- Adeegga xakamaynta cayayaanka
- Kharashaadka barnaamijka
- Kharashyada guurista/dib-u-dejinta
- Kirada/amaahda guryaha, biilasha sida korontada , Caymiska
- Badbaadada nooc kasta ah (ganacsi, qori)
- Mushaharka, Shatiyada, Taageerada Shaqaalaha, Kharashyada Shaqaalaysiinta/qorista
- Gaadiidka (oo ay ku jiraan kuraasta caruurta)

**Shubka:**

- **HAA:** Buuxi dildilaaca yar yar; dhoobo-jaridda ama shubka meel yar si loo hagaajiyo khatarta jabka; libka isku darka sibirka ee mashaariicda dayactirka yar yar bixiyayaasha ayaa samayn doona ama qayb ka mid ah rakibidda deyrka. Shub ku daboolista gudaha ee booska shatiga leh.
- **MAYA:**
  - Burburinta ama fogaynta iyo/ama qaadista shubka jira
  - Ku-daridda/beddelka birta shubka
  - Shubitaanka shubka cusub ee ujeeddo kasta

- Ku darista/dib-u-habaynta barxada inta u dhaxaysa dariiqa gaadhiga iyo garaashka ama ku darida barxada wadada
- Ku darista meel la taaban karo oo wareeg ah
- Shaabadaynta shamiitada (shaabadaynta alwaaxa) ee sagxadaha/asaaska
- Dayactirka/beddelka/sixitaanka sagxadaha shubka ah, aasaaska, darbiyada, ama jaranjarooyinka.

**Dhismaha:**

- **MAYA:** Goobta oo wax lagadhiso ama balaadhinta xarun kasta ama dhismo kasta laakiin kuma koobna daashka

**Beddelka booska:**

- **HAA:** Qayb yar oo ka mid ah mashruuca oo si dhamaystiran dib loo dayactirayo/la bedelayo
- **MAYA:** Beddel dhammaystiran ama dib-u-dayactirka garaashka, dhismaha bannaanka, ama xarunta bulshada, oo ay ku jirto laakiin aan ku xaddidnayn kaniisadda, iskuul, bakhaarka hortiisa, meheradda, guri bannaan, xarunta bulshada, boodhka(meel-bannaan oo laisugu imaado), ama xarunta waayeelada

- **Alaabaha COVID 19:**
  - **MAYA:** Gudaha iyo dibadda COVID-19/alaabo kala duwan oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn kala-xirayaasha la qaadi karo, gaashaanka caaga ah, maacuunta la tuuri karo, suxuunta, calaamadaha, weelasha kaydinta, maaskaro, galoofyada, iyo gacmo nadiifiyaasha

**Biya-qaadayaasha Buundooyinka:**

- **MAYA:** ku-daridda/beddelka/dib-u-habaynta godadka biyaha maraan ama buundooyinka shay kasta

**Adeegga Deynta, Lacag-hormarinta ama Iibsiyada Hore**

- **MAYA:** dib u bixinta deymaha, dib u bixinta iibsigii hore ama nooc kasta oo adeega deynta ah, ama shay kasta/adeeg kasta oo lacag-bixin la sameeyey ka hor abaal-marinta deeqda/soo celinta heshiiska deeqda

**Barandada kor uqaadan/barandada/barxadda guriga:**

**HAA:** Ku dar gidaarka alwaaxa kasameysan/gidaarka safiitada dheeri ah oo amaan ah barandada kor uqaadan haddii ey kafogtahay koodka shatiga iyo haddii barandada kor-u-qaadan loo isticmaalo barnaamijka daryeelka caruurta iyo haddii barandada kor-u-qaadan ay ka sarreyso 3' dhulka bannaanka ah, una baahantahay gidaar alwaax/bir ah. Ku daridda jaranjaro alwaax ah haddii eysan lahayn oo na loo baahdo meel dabka looga baxo – cadaymaha dhamaan looga baahan yahay.

o

**Gurada Sare/Balbalada ilinka guriga/Daaradda hore (sii socota.):**

- **MAYA:** Ku-darka, rinjiyeynta (staining), rinjiyeynta, dib-u-dhamaynta ama burburinta gurada Sare, balbalada ilinka guriga ama daaradda hore; beddelidda gurada Sare, balbalada ilinka guriga ama daaradda hore, samaynta dayrka birta ah, dayr jaranjarta ku hareersan; daboolidda ama shaashadda gurada sare, balbalada ilinka guriga, qolka qoraxda ama daaradda hore.

**Duminta:**

- **MAYA:** Duminta nooc kastaba ha ahaatee

**Alaabta Daryeelka Gaarka ah ee La Tuuri karo/ Hal Mar La Isticmaali karo:**

- **MAYA:** alaabaha iyo shay-yasha, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn cuntada, xafaayadaha, waraaqaha, masaxaradaha, iwm.

**Lacagta Hormariska loo Baxsho iyo Iibsiyaasha Hore ama Ballanqaadyada:**

- **MAYA:** maalgelinta shay kasta oo lacag-bixin-hore ah ama ballan-qaad ka hor la sameeyay ka hor aqbalaadda abaalmarinta deeqda iyo soo celinta heshiiska deeqda; bixinta iibsiyadii hore ama ama dib u bixin kasta oo amaah ama qayb qayb ubixin. Lacag-hormarinta la bixiyay kahor bixinta abaal-marin/soo-celinta heshiiska deeqda waxay meesha ka saaraysaa shayga/adeegga oo dhan - ma aha oo keliya qaybta lagu bixiyo lacag-hormariska.

- **Albaabada:**
  - **HAA**: Ku-daridda albaabbada gudaha ee cusub ama beddelidda albaabbada gudaha/ dibadda waxyeello awgeed; beddelka loo oggol yahay albaab la mid ah asalka; bedelidda albaabka garaashka ku lifaaqan si uu ula kulmo xeerka dabka; Qufulka caadiga ah iyo qalabka albaabka kaliya
  - **MAYA:** Nidaamyada gelitaanka aan furaha lahayn ama albaabbada amni ahaan isku xira koodadka Wi-Fi-ga; cusboonaysiinta albaabbada ama qalabka ujeedooyinka qurxinta/ka manasheegta quruxda; albaabbada garaashka (midna aan ahayn albaabbada kor u duubma ama albaababada adeegga); gambaleelka albaabka noocuu doono ha ahaadee.

**Duubka Biyo-Baxa:**

- **HAA**: Ku rakibidda duubka biyo-baxa iyo/ama bamka-biyaha wasakhda kaydiya caafimaad ama amaan dartood aad u beddesho aagga barnaamijka daryeelka caruurta
- **MAYA:**
  - Shaqada aasaasiga ah ee ka baxsan rakibidda duubka biya-baxa; xargaha aasaaska; biyo mareenada dibadda ama dhul-qurxinta
  - Biyo-baxyada Isbaanishka iyo/ama Faransiiska
  - Goobaha biya mareenada

**<u>Waddada Gaarigu Maro/ Baakinka/Barxadda/Wadda Dadku Maraan:</u>**

- **HAA:**
  - Ku darida meel yar oo gaarigu si amaan ah ugu kalawareego, (aan ahayn shub) aan ka weyneyn baarkinka caadiga ah (10x12) kaas oo baabuurtu gadaal gadaal ugu kala waregaan. U qalma kaliya marka loo baahdo ama uu ku taliyay shati-tiilah sababtoo ah waddo mashuul ah ayaa mesha marta (sida waddo weyn) - Cadeymo qoran ayaa loo baahan yahay
  - Dayactir <u>yar</u> oo lagu buuxinayo godadka yar yar ama dildilaaca waddada ama baakinka baabuurta la dhigto, ama jajabyada waddada dadku maraan ama barxadda haddii ay keeneyso khatar caafimaad ama mid ammaan. Tan waxa ku jira dhoobeynta ama jajabinta wadada dadku maraan.
  - Hagaaji, ku dar ama beddelo biraha baarkinka ama meelaha naafada ah u hoggaansanaanta ADA.

- **MAYA:**
  - Dib-u-shamiiteynta, dib-u-habaynta ama dib-u-samaynta qaybo ballaadhan oo ah baarkinka ama jid-mareenka gaariga oo leh dhammaan noocyadasagxadaha oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn quruurux/jay, laami saarista, shubka, dhagax digir, iwm.
  - Dib u rinjiyeynta xariijimaha baarkinka oo dhan
  - Ku-daridda meel gaarigu ku kalaweego haddii loo baahnaay ama uu kutaliyay shatiyuhu oo aan loohayn caddeyn qoran.
  - Ku daridda waddo wareeg ah, waddo balaarinta ama meel kasta oo bannaan oo gaarigu ku kalawareego oo ka weyn 10x12 ama meel kasta oo shamiiteynsan xiitaa haddii shati-yuhu aw kutaliyay.

**<u>Waddada Gaarigu Maro/ Baakinka/Barxadda/Wadda Dadku Maraan (sii socota:</u>**

- **MAYA:**

- Ku darista ama bedelida sagaxadda barxadda ama wadada dadku maraan - oo ay ku jiraan dhagaxaanta malaaska/dhagaxaanta lagu istaago.
- Dayactir kasta oo u baahan birta shubka iyo/ama ku shubista shubka
- Ku darista ama hagaajinta godadka biyaha maraan ama buundooyinka

**<u>gidaarka qallalan/Ulaha gidaarka:</u>**

- **HAA:** Dayactirka/beddelka gidaarka engegan, ulaha culeyska guriga aan wax kahayn si loo hagaajiyo burburka; ku darista darbiga qallalan ee shuruudaha marshal kasta ama si loo kordhiyo booska iyo awooda shatiga.
- **MAYA:** Bixinta darbiyada culeyska guriga haya; dahaar ku daridda gidaarka gadaashiisa; mashruuc dhismeed oo u baahan in loo duleeliyo gidaarka sida meel ey hawo ka soogasho.

- **<u>Shaqada Dhuumaha(duct):</u>**
  - **MAYA:** Nadiifinta, rakibidda dhuumaha hawada dhexe ama bedelidda asalka kulaylka oo u baahan rakibidda hawo cusub ama shaqada dhuumaha/tubbooyinka, iwm. Dayactir laguma samaynayo dhuumooyinka, tubooyinka iyo hawo-qaadista jira. Qiimaha qandaraasyadu waa in si gooni ah loo qoraa si ey aga duwanaadaan qiimaha rakibaadda marka shaqada dhismo ku lug leedahay.

**<u>Daaqadda lagaboxo (Egress Window):</u>**

- **HAA:** U beddel daaqadda jirta una beddel daaqadda laga bixikaro (agress) si aad u buuxiso shuruudaha shatiga daryeelka caruurta, ku dar ama ballaadhi daaqadda laga bixikaro si ay u sahlanaato gelitaanka goobta xannaanada carruurta, ku dar jaranjaro iyo biro si aad si fudud ugu gasho baxsiga dabka.
- **MAYA:** Ma jiro dayac tir dariishada laga bixikaro si loo xakameeyo biyaha qaybta hoose ee dhismaha ama lagu daro daaqada laga

bixikaro meel banaan oo aanu isticmaalin barnaamijka daryeelka caruurta.

**Koronto:**

- **HAA:** Ku darida meesha laga qaato quwad koronto; beddelidda furayaasha ama meesha laga qaato quwad koronto; ku darida nalka saqafka ee meel aan la dhammayn.
- **MAYA:** dhamaystirka fiilootinka goobta aan la dhamayn; mashaariicda fiilooyinka kuwaas oo loo tixgelin lahaa qaab-dhismeedka dabiiciga ah. Fiilooyinka korantada ee rakibaadda qalabka; beddelidda wareegtada korontada ama meesha koronto laga maamulo ama qaybaha; ama ku darista meesha korontada laga maamulo ee meel aan la dhamaystirin.

**Albaabada Dibadda iyo kuwa Dabka looga baxsado:**

**HAA:** Dayactirka ama beddelka albaabka dibadda iyo/ama albaabka dhalada ah/albaabada duufaanta, qufulka caadiga ah, iyo/ama qalabka burburta. Beddelka loo ogol yahay albaabada la midka ah asalka – dukumeenti ayaa looga baahan yahay albaabada qurxinta. U sameynta meel sahlan ow kabixi karo dabdamiyuhu taas oon keeni doonin in gidaarka meelkale laga duleeliyo.

- **MAYA:** Goynta albaab cusub oo gidaarka dibadda ah; wareejinta meel albaabka dibadda ah; nidaamyada gelitaanka fura la'aanta; Albaabka ammaanka ah oo isku xira koodka Wi-Fi-ga ah

**Sagxadaha Bannaanka:**

- **HAA:**
  - Dayactirka ama beddelka qayb yar oo shingles ah (gidaarka guriga) oo wax gaareen waa haddii shati-yuhu kutaliyo sabab caafimaad iyo mid amaanba - Cadeyn qoran ayaa loo baahan yahay
  - Rinjiyeynta sunta lead-ka si looyareeyo suntaas- cadaynta rinjiyeyna lead-ka waa loo baahanyahay.
- **MAYA:**

- Rinjiyeynta/rinjiyeynta (staining) dhismaha oo ay ku jiraan balbalada/barandada ilinka/jaranjarooyinka/daashka ama dhismo kale oo banaanka ka dhisan
- Rinjiyeynta/rinjiyeynta (staining) ee dayrarka
- Cusbooneysiinta ama badalka kuwa gidaarka lagudhiso
- Ku daridda, hagaajinta, ama beddelka majaroofyada/mareennada hoos biyaha usoo qaada, shiraacyada ama shirraca gelitaanka albaabka
- Dayactirka ama bedellidda saqafka

**<u>Dusha sare ee dibadda (sii socota):</u>**

- Ku daridda meel laga boxo taasoo keeneysa in gidaarka dibadda laga duleeliyo
- Dahaaridda gudaha ama dibadda
- Xirmooyinka baaritaanka rinjiga rasaasta

- **<u>Kharashyada:</u>**
  - **HAA:**
    - Kharashaadka oggolaanshaha iyo/ama kormeerka loo baahan yahay ee mashruuca(yada) deeq-lacageedka la dhammaystiray ee degmo kasta
    - Kharashaadka la-talinta ee la xiriira naqshadaynta jawi waxbarasho oo gudaha ama dibadda ah
  - **MAYA:**
    - Kharashka qiimo sheega ama cabbiraadda (kharashka qiima dheega/cabirka kama saarayso shayga tixgelinta, laakiin dib u soo celinta khidmadda uma qalanto maalgelinta deeqda)
    - Lacag hormarinta ama qayb-qayb-bixinta, ama shay kasta oo lacagahan la bixiyay ka hor abaal-marin deeqda iyo soo celinta heshiiska deeqda

- **Dayrarka:**
  - **HAA:** meesha bannaan oo lagu ciyaaro daryeelka caruurta iyo/ama agagaarka barkadaha dabaasha/ ilaha biyaha, bixinta xayndaabk si habsami leh loogu talagalay badbaadada carruurta, oo ay ku jiraan shabaqa siliga ah, qarsoodiga iyo dayrka alwaaxda kasamaysan - dayrka alwaaxda kasamaysan waa inay ahaadaan kuwo isku dhow oo ku filan oo aanu caruurtu ka dhex bixi karin. Ka eeg qaybta shaqada ee buuga deeqaha hab-raacyada rakibidda.

  - **MAYA:**
  - markii lagu rakibo meel ka baxsan goobta ciyaarta ee barnaamijka daryeelka caruurta;
  - dayr kast oo leh meel u ogolaaneysa caruurta in ey hoos, kor ama dhexmaraan
  - oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn xayndaabyada kala-fogfog iyo kuwa isku dhadhaw lakiin aan wax qarineyn;
  - dayr qurxin aan loogu talagalin in lagu sugo badbaadada caruurta;

**Dayrka (sii socota):**

- **MAYA:**
  - rinji/rinji (stain) ee deyrarka iyo/ama shaqaale la soo shaqaaleysiiyay si ay u rinjiyeeyaan/u rinjiyeeyaan (staining) dayrarka
  - Shabaqa eygu ku dhex ordo, shabaqa ayga lagu ama noocyada kale ee xoolaha lagu xareeyo
  - Shaashada dabaysha celisa ee ku duuban dayrka siliga ah

**Albaabka Dabka iyo Meel lagu Baxsado:**

- **HAA:** Ku darista ama bedelida jaranjarada badbaadada dabka ee burburay; ku darista ama dayactir yar ee jaranjarta alwaaxa si looga baxo dabka; ku darida biraha gacmaha ee la cugsado marka jaranjarta lagu socdo meshii markii hore aan lahayn iyo darbiga jaranjarta lagu wareejiyo haddii loo baahdo in ka badan 3 tallaabo.

- **MAYA:** Duminta jaranjar lagu baxo; lagama samayn karo albaab cusub gidaarada dibadda.

**Xakamaynta Dabka/Kaarbon Dioxide-ka/Radon-ka:**

- **HAA:** Ku darista ama bedelidda qalabka ogaada sunta lead-ka, dabka, radon-ka, kaarboon dioxide-ka(Co2) alaarmiyaasha iyo dab-damiyaasha; hagaajinta ama ku rakibidda nidaamka rusheeyaha/nidaamka dab xakamaynta gudaha aagga barnaamijka daryeelka caruurta marka uu u baahdo maarshaalka dab-demiska (cadayn ayaa loo baahan yahay).
- **MAYA:** xirmooyinka tijaabada.

**Meelaha dabka lagu shido/Isha Kulaylka:**

- **HAA:** Dhalooyin/daboolo ama kalaqeybinta si looga ilaaliyo carruurta meelaha dabka lagu shido, kululeysooyinka guriga iyo/ama shoolooyinka qoryaha lagu shido
- **MAYA:** Ku darista meelaha dabka lagu shido ama meel kasta oo la qaadi karo, taagan oo xor ah ama il kulayl yar oo kala qaybsan.

**Sagxadaynta:**

- **HAA:** Ku darista ama bedelidda daboolida sagxadda joogtada ah burbur soo gaaray dartis (sida rooga, linoleum-ka, alwaaxa, mutuleelka, LVP-ga) meelaha ay caruurtu si joogto ah u joogaan oo kaliya, guda ka shubista ee meesha shatiga leh.
- **MAYA:** Roogyada waaweyn, roogyada yaryar, gogosha ciyaarta, roogagga fasalka; hagaajinta ama beddelka sagxadda kayb ka mid ah ama aasaaska; kulaylka gudaha. Beddelida gogosha sagxadda

joogtada ah oon wax cilada qabin in la cusboonaysiiyo / ujeeddo bilic usameyn ah

**Foornada:**

- **HAA:**
  - Dayactirka foornada hadda taala ama iibsashada foorna cusub - qiimaha halbeega keliya. Qiima-sheegayaasha waa inay caddeeyaan qiimaha iibka ee qalabka si ka duwan shuruudaha rakibaadda iyo agabka dheeriga ah sida shaqada rakibida iyo tuubbooyinka, hawo-mareenka, dhuumooyinka dheeriga ah, iwm. waa qaab dhismeed oo aan u qalmin. Kharashka qalabka kaliya ayaa u qalma 100% qaab dhismeedkiisa oo dhamaystiran barnaamijka daryeelka caruurta; 50% meel la wadaago (guriga qoyska ama goobta urur la wadaago).
- **MAYA:**
  - Khidmadaha shaqada/rakibaadda ama kharashka shaqada dhuumooyinka ee dheeriga ah, hawo-qaadista, tuubooyinka, agabka dheeraadka ah, iwm.
  - Isha kulayl kasta/kala qaybsanaan yar oo u baahan in dalool laga gooyo gidaarka ama sagxada dibadda
  - Isha kulaylka la qaadan karo ama meesha dabka lagu shido
  - Dammaanadda la dheereeyey ama khidmadaha qorshaha adeegga.

**Alaabta ama qalabeynta:**

- **HAA:**
  - Alaabta barnaamijyada daryeelka caruurt (sariirta caruurta, joodariga sariirta caruurta, sariirta caruurta ee xiran, sariiraha fitsan, miiska ilmaha dharka looga bedelo, miiska caruurta, iyo kuraas, khaanadaha/kabadhada, kuraasta carruurta ee aan loogu talagelin

gaadiidka, meesha ilmaha dharka surtan, kaydinta, kursi sare, kursiga socod baradka, tuujiga fadhiga, iwm.)

- Alaabta xafiiska: Alaabta xafiiska ee loogu talagalay barnaamijka daryeelka caruurta (kabarka faylka, miis, kursi, qolka shirarka ama miiska qolka nasashada, kuraasta qolka shirarka)

- **MAYA:**

- Alaabta guryaha ee dadka waaweyn ee aan si gaar ah loo ogolayn oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn fadhiga, kuraas cufan, kursi-ku-jiid, kuraas horay iyo gadaal ulusha, miisaska xafladaha, alaabta guriga lagu qurxiyo, sariiraha, armaajooyinka, miiska dalxiiska ee bananka ladhigto oo dhamaystiran.
- Bean bag chairs
- Kuraasta baabuurta ee carurta
- Darbiga waxa lasuro ama laga soo laalaadiyo oo ay ku jiraan muraayadaha
- Roogagga: Roogagga waaweyn, roogagga yaryar, roogagga ciyaarta, roogagga fasalka
- Marooyinka/Weelahasha ama Beshinada: Alaabooyinka ay ku jiraan marooyin, go'yaal, kuwa miiska laga badalo/kuwa sarirta caruurta lagu goglo, weelasha ama beeshinada/dambiilada ay ku jiraan kuwa loo isticmaalo kaydinta ilamaha alaabtooda, weelasha wax lagu kaydiyo, dambiilaha qashinka

<u>**Garaash:**</u>

- **HAA:** Beddelida albaabka u dhexeeya guriga iyo garaashka si loo buuxiyo xeerka dabka ee shuruudaha shatiga.
- **MAYA:** Beddelidda, hagaajinta, baadhista ama wax ka beddelka albaabbada garaashyada, albaabbada adeegga dibadda, daaqadaha, derbiyada ama sagxada.

**<u>Caws:</u>**

- **HAA:** Backfill of dirt/grass seed from tree removal/stump grinding directly in playground area only (documentation required)
- **MAYA:** Sod (neither removal nor addition)

- **<u>Majaroofka kore/majaroofka hoos biyaha u shuba:</u>**
  - **MAYA:** ku-darka, bixinta, bedelidda ama hagaajinta Majaroofka kore/majaroofka hoos biyaha u shuba, saqafka, ama shiraaca albaabada.

**<u>HVAC (kuleyliyaha, hawo-qaadista, qaboojinta):</u>**

- **HAA:** Iibka ama dayactirka foornada, bamka shidaalka, kuleyliyaha biyaha ama qaboojiyaha -qiima-sheegayaasha waa inay caddeeyaan qiimaha iibka qalabka (yada) si ka duwan shuruudaha rakibaadda maadaama hawo-mareen dheeraad ah, dhuumaha, iwm. ay tahay qaab dhismeed oo aan u qalmin. Kharashka qalabku waxa uu uqalmaa 100% haddii dhismaha oo dhan loogu talagalay barnaamijka daryeelka caruurta; 50% meel lagula wadaago (guriga qoyska ama goobta ururka la wadaago). Shaqaynta dayactirka hal safar ama dayactir hal mar ah.
- **MAYA:**
  - Shaqaynta/rakibaadda ama kharashka cusub/dheeraadka/bedelka dhuumooyinka, hawo-mareenka, tuubooyinka, qaybo/qalab dheeraad ah, iwm.;
  - Qaybaha yar yar sida ay u baahan yihiin in dalool laga gooyo gidaarka;
  - Kuleylka gudaha ah maadaama tani ay tahay qaab dhismeed;
  - Ilaha kulaylka la qaadi karo;
  - Dammaanadda la dheereeyey ama khidmadaha qorshaha adeegga.

**<u>Derbiyada gudaha/Saqafka:</u>**

- **HAA:** Dayactir yar oo lagu sameeyo gidaarada gudaha ama saqafka sare ee booska barnaamijka daryeelka carurta, oo uu ku jiro rinjiga
- **MAYA:** dahaaridda

**Jikada/jikada yar:**

- **HAA:** Dayactirka/ku-daridda jiko yar oo u heellan barnaamijka daryeelka carruurta; hagaajinta/bedelidda walxaha burburay ee jikada la wadaago oo ay ku jiraan sagxadda, saxanka waxka lagu dhaqo/tubada, miiska/meelaha kale ee jikada. Qalabku waxaa u qalma 50% meelaha la wadaago iyo 100% goobta iyo meesha loo isticmaalo kaliya daryeelka caruurta
- **MAYA:** Beddelida alaabta jikada ee shaqaynaysa ee ujeedooyinka qurxinta/kor u qaadida sida kor u qaadida miisaska kasamaysan dhagaxa (granite)ama ku darista armaajo si ay u qariso caaga qashinka.

- **Adeegyada Shaqada ama Heshiiska:**

  - **HAA**: Waqtiga shaqaalaha ka shaqeeya aagga la codsaday, bixinta magacooda, magaca ganacsiga, ciwaanka, IYO TELEFOONKA ayaa lagu muujiyay qiima-sheega ka hor abaal-marinnada deeqda iyo rasiidhada shaqada la qabtay. Nambarka shatiga waa in la diiwaangeliyaa marka shatiga loo baahan yahay shaqada ay qabato sharciga gobolka ama degmada. Shaqaaluhu waa inay buuxiyaan ogolaanshaha iyo xeerarka hubinta tayada. Haddii rasiidhada la bixiyo oo buuxa ay yihiin kuwo gacanta lagu qoray, horayda iyo dhabarka jeeg la joojiyay ama bayaanka kaadhka daynta ee muujinaya lacag bixinta qandaraaslaha ayaa loo baahan doonaa warbixinta ugu dambeysa.
  - **MAYA:** Shaqada la qabtay oo ay qabtaan shaqaalaha xanaanada caruurta, bixiyaha xanaanada caruurta ama xubin qoyska ka tirsan, xitaa haddii xubin qoyska ka mid ah uu yahay qandaraasle shati haysta ama uu qabto nooca shaqada ee nolosha looga baahan yahay.

**Haddii shaqada la go'aamiyo in uu sameeyay xubin qoyska ka mid ah ama shakhsiga la deggan bixiyaha xanaanada carruurta, xitaa haddii kharashka shaqada lagu oggolaaday warqadda abaalmarinta, kharashka shaqada waa la diidi doonaa.**

- **<u>Meesha dharka lagu dhaqdo:</u>**
  - **HAA:** Dib-u-dayactirka/samaynta goobta dharka lagu dhaqdo ee loogu talagalay daryeelka carruurta; Dayactirka (safar-hal) ama beddelka qalabyada burburay (50% ee meelaha la wadaago, 100% loo isticmaalo kaliya daryeelka caruurta)
  - **MAYA:** Adeegga dharka lagu dhaqdo ama dammaanad-kordhinta/qorshayaasha adeegga.

- **<u>Daryeelka Cawska/Dhul-dhismeed:</u>**
  - **MAYA:** oo ay ku jiraan laakiin aan ku
    - habeynta biyaha;
    - ku darista buundada, mutuleel ama dhagaxa mutuleelka camal la isku galgaliyo korka dhulka qoyan;
    - ku darista ama bedelidda cowska la goglo(sod) ama beeridda kale;
    - ku darista ama bedelida xashka/dhagaxa pea-ga meel kasta oo kale nidaamka ciyaarta dibadda;
    - ku-daridda, hagaajinta ama bedelidda darbiga dhulka celiya;
    - jajabinta ama isla simista

- buuxinta wasakh iyo iniin caws oo aan ahayn geed ka saarista goobta ciyaarta;
- ku-darista ama bedelidda goobta bullaacadaha;
- ku darida goobta bulaacada si loo jiheeyo biya-baxa;
- daryeelka cawska ama qalabka lagu xaaqo barafka ama adeegyada;
- iibsiga dhulka
- Nidaamyada rushaynta cawska dhan oo ay ku jiraan tusaaleyaal uu bixiyaha ku tilmaamayo in dayrkooda oo dhan ay u isticmaalaan carruurtu.

**Barashada iyo ciyaarta:**

**MAYA:**

- Alaabta lagu ciyaaro – gudaha iyo dibaddaba, oo ay ku jiraan shabaqa ama deyrarka caruurta ee la qaadi karo iyo kuwa ilmuhu koraan/qalabka iswata ee ilmuhu kuciyaaraan (play set) iyada oo aan loo eegin baaxadda
- Guryaha lagu Ciyaaro oo la qaadi karo iyo qaab dhismeed kasta oo saqaf leh
- Alaabaha caruurta lagu wado (Ride-ons) ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn gawaarida 4-lugoodka ah (buggies), kuwa Caruurta lagu kuriixo (strollers), kuma caruurta lagu jiido (wagons), baaskiilada, baaskiilada 3-lugoodka, mootooyinka waaweyn, mootooyinka iyo koofiyadaha
- Alaabada ay carurtu ku ciyaarto – gudaha iyo dibaddaba, oo ay ku jiraan roogagga ciyaarta ee la qaadan karo ee dhallaanka, gaariga carurtu ku socdaan (exersaucers) iyo kan socod baradka fuulaan/ agabka caruurtu ku ciyaaraan ee is wata (iyada oo aan loo eegin baaxadda)

**Barashada iyo Ciyaarta (sii wad):**

- **MAYA:**

- Ciyaaro riwaayado leh oo ay ku jiraan madbakhyada ciyaarta, labiska, kuraasta ciyaarta, iwm.
- Alaabta/miisaska iyo qalabka lagu ciyaaro
- Waxqabadyada Dhallaanka/Saan-qaad-baradka
- Qalabka muusiga iyo ciyaaraha
- Alaabaha Farshaxanka ama Sayniska ama Qalabka(kits)
- Buugaagta, Manhajka
- sharaxaada gidaarada ka laadlaada, muraayadaha. ama qurxin

**Iftiiminta:**

- **HAA:** Ku beddelka qalabka nalka ee jaban ama nalka hadda jira oo lagu beddelo nalalka gaashaanman ama nalalka leh wax ka celiya burburka; ku darista kuwa jabka ka ilaaliya nalka ee saqafka aan la dhammayn.
- **MAYA:** Beddelida nalka qaab ama sababo qurxoon awgeed; beddelidda nalka u baahan shaqo dhisme ama dib-u-dayactirka weyn; Laambadaha istaaga ama nalalka habeenkii

**Dib-u-Dayactirka Weyn:**

- **MAYA:** Dib-u-dayactirka weyn waxaa mamnuucay ilaha maalgelinta waxaana lagu qeexaa isbedel qaabdhismeedka aasaaska, saqafka, sagxadda, bannaanka ama darbiyada haya culayska xarunta, ama kordhinta xarunta si loo kordhiyo bedkeeda; ama wax ka bedel ballaaran oo lagu sameeyo xarunta sida in si weyn loo beddelo shaqadeeda iyo ujeedkeeda, xitaa haddii dib-u-dayactirkaas aanay ku jirin wax isbeddel dhisme ah

**Gaadiidka matoorka leh:**

- **MAYA:** Gaadiidka lagu qaado carruurta iyo qaadidda qalabka badbaadada sida kuraasta gawaarida

**Xafiiska:**

- **HAA:** Alaabta xafiiska ee u heellan barnaamijka daryeelka caruurta (kabarka faylka, miiska shaqada, kursiga, miiska cuntada)
- **MAYA:** Qalabka xafiiska (taleefanka, koobiyeeyaha, kumbuyuutarka, laptop-ka, tablet-ka, software-ka, daabacaha, khadka, warqadaha/qalabka shaqada la xariira, kamarada, qalabka la socodka oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn qalabka kor kala socodka dhallaanka iyo kamaradaha amniga, gambaleelada fiidyowga, iwm.)

**Rinjiyeynta:**

- **HAA:** rinji gudaha ah, alaabta rinjiga (caaga fitsan ee rinjiga, kan laynka lagu simo, marooyinka rinjiga alaabta looga daboolo, ilaa 3 burush rinji/ kan rinjiga lagu mariyo ee wareegsama) ama shaqaaleysiinta rinji booska barnaamijka daryeelka caruurta. Fuut laba jibaaran oo ah meel(yada) daryeelka caruurta in la rinjiyeeyo ayaa looga baahan yahay cadadka rinjiga la codsado
- **MAYA:** qalabka korontada (awood buufiye rinji) ama qalab gacanta ee ka baxsan waxa la tixraacay; rinjiyeynta dhammaan guriga dhexdiisa; rinjiyeynta ama rinjiyeynta (staining) dusha sare oo ay ku jiraan qalabka ciyaarta, dhinacyada, sagxadaha, balbalada, qolalka qoraxda, dayrarka, ama daashashka/dhismaha bannaanka.

**Meelaha Korontada laga Maamulo(Panels):**

- **HAA:** Ku darista ama bedelidda si joogta ah gidaarada kala qarinaaya si loo yareeyo faafitaanka jeermiska meelaha caruurtu joogaan ama meelaha waalidku caruurta kudajiyaan; ku-daridda/bedelidda gidaarada dhawaaqa ama qaylada-celiya; ku darida gidaar ammaan ah barandada sare, KALIYA haddii Sprinles (darbi alwaax kasameysan) ay aad uga fog yihiin koodka shatiga – cadaymaha loo baahan yahay
- **MAYA:** Ku darista meel korontada laga maamulo ee meel aan la dhamayn.

**Qalabka iswata ee ilmuhu kuciyaaraan(playsets):**

- **HAA:** Hagaajinta ama ku darida qalabka ciyaaraha bannaanka ee joogtada ah iyo muuqaallada ciyaaraha sida lulida, taraaraxa, korista, goobta wareegsan ee banooniga ilamaha kuciyaaraan (gaga), cabbir buuxa, kubbadda kolayga joogtada ah iyo agabka la xiriira; bedelida qaybaha dhaawacan ee qalabka ciyaarta; beddelidda dusha sare ee qalabka ciyaarta si looga badbaado dhicis; diyaarinta oogada dhulka si loogu sameeyo ciyaar cusub.
- **MAYA:** Rinjiyeynta / rinjiyeynta (staining); trampoline-yada lagu boodboodo; taraaraxa ama dhismayaal kale oo loogu isticmaalo barkadaha dabaasha ama harooyinka; Agabka caruurta ama socod-baradku kuciyaaraan ee la qaadi karo oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn Talaabada 2aad, tan yar ee taraaraxa, tunnel-yada, guryaha ciyaarta ama alaabaha kale ee waaweyn ee baabuurta; alaabta ciyaarta ee la qaadi karo sida "jiridda" iyo biyaha dibadda / dhismayaasha dareenka; qalab lagu ciyaaro gudaha ama dibadda/ qalabka waaweyn ee lagu ciyaaro ee gawaarida

**Caqabadaha ama Xuduudaha qalabka laguciyaaro:**

- **HAA:** Ka saaridda iyo bedelida caqabadaha qudhmay ama soohdinta dhaawacan ee aagga ciyaarta; ka saarista caqabadaha alwaax ee ay ku jiraan kareosote-ga ama arsenic-ga; dhisidda meel ammaan ah oo ka hooseysa qalabka ciyaarta
- **MAYA:** rinjiyeynta / rinjiyeynta (staining); derbiyada dhagaxa ah/xajinta ama alwaaxyada la daweeyay ee kiristoot/arsenic; aan lagu darin ama lagu hagaajin buundooyinka ama biyo mareenada korka laamiyada ee meelaha qoyan.

**Dhulka Goobta Ciyaarta:**

- **HAA:** Dusha cusub ee aagga ciyaarta bannaanka si looga ilaaliyo dhaawaca soo dhaca ama beddelka dusha tooska ah ee hoos yimaada qaab-dhismeedyada lulid/ korista iyadoo shardi ah in walxaha beddelka ah lagu oggolaado shati; ku darista sanduuqa ciidda iyo/ama daboolka sanduuqa-cammuudka; dusha dusiyo jilicsan ama xumbo/caag bannaanka ciyaarta dushooda
- **MAYA:** Concrete for sport court, patio, or bicycle track; replacing mulch/ground cover around facility, under decks

**Qalabka caruurta lagu wado:**

- **MAYA:** gawaarida 4-lugoodka ah (buggies), kuwa caruurta lagu riixo(strollers), kuma caruurta lagu jiido (wagons), baaskiilada, baaskiilada 3-lugoodka, mootooyinka waaweyn, mootooyinka iyo koofiyadaha, kuraasta baabuurta, iwm.

**Caradacama Sanduuqyada ciidda:**

- **HAA:** Ciid cusub oo loogu talagalay sanduuqa-ciida, beddelidda sanduuqa ciidda, agabka lagu dhiso sanduuqa-ciidda, iyo daboolada sanduuqa ciidda

**Mashiinnada Nadaafadda:**

- **HAA:** Qalabka nadaafadda (sida Zono)
- **MAYA:** Nadiifinta buufinta, gacmo nadiifiyaha ama alaabta nadiifinta

**Ammaanka/Nidaamka kamarada:**

- **MAYA:** kamaradaha gambaleelka; garaacista iyo muuqaalada gambaleelka albaabka; qalabka la socodka; hababka gelitaanka fura-la’aanta; albaabbada isxira oo isticmala wifi-ga; Nidaam kasta oo leh muuqaal wax lagula socdo ama nidaam kasta oo ammaan ah; adeegyada lasocodka amniga

**<u>Harka ama harka dhismayaasha:</u>**

- **HAA:** kaydka qolka yar ee hore loo sii hagaajiyey oo la geeyey goobta xanaanada carruurta ama xirmooyinka daashka la taagay **ee aan u baahnayn qalabyada gacanta ee la iskula xirxiro**, oo u heellan barnaamijka daryeelka carruurta ee qalabka bannaanka oo aan ka badnayn 120 fiit laba jibaaran (sida 10x12); guri-ciyaareed ka weyn qaab dhismeedka socod baradka ah laakiin aan ka badnayn 120 fiit oo laba jibbaaran; sagxadda ka hooseysa daashka ayaa laga yaabaa in la tixgeliyo. Shaqada aan u baahnayn dhismo la isugu keeno xirmada daashka ayaa la tixgelin karaa.
- **MAYA:**
- Guryaha-harka ee waaweyn, xitaa haddii horay loo sii diyaariyey ama loo gaday qalab ahaan haddii ay ka weyn yihiin 120 fiit laba jibbaaran.
- Goobta lagama dhisi karo guryo la harsado cabir kastaba ha ahaadeene. Ma jiraan walxo alwaax ah oo loogu talagalay bixiyayaasha si ay isugu xirxiraan/dhisaan daash goobta.
- liisaska agabka EZ Build ama xirmooyinka aan u baahnayn miinshaar laakiin u baahan dhismo (tusaale, qalabka loo baahan yahay isku-qaqabashada).
- Ma jiro saqafyo kore (lofts) ay ogoshahay DHS iyo isticmaalka iskafaalayaal oo alaabtu kusoo dul dhici karto carruurta.
- Guryaha digaaga ama cabbiraadaha xakamaynta xayawaanka.
- Aasaasyada shubka ama dhul-qurxinta muhiimka ah ee xagxadda daash (shed).
- Codsiyada in lagu bixiyo faraqa u dhexeeya qiimaha daash ka weyn 120 fiit oo laba jibbaaran.
- Qiimaha daashashka laga helay in laga dhisay goobta ama ay ku jiraan saqafyada kore/iskafaalayaasha waaweyn inta lagu jiro iswaafajinta kama dambaysta ah.

**<u>Qolka Buktada/qol-deggan:</u>**

- **HAA:** Dayactirka/ku-darka qolka buktada iyo/ama qol-deggan oo ka baxsan goobta hawsha

- **MAYA:** Qalabka guryaha ee dadka waaweyn oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn sariiraha, kuraasta lulma, kuraasta cufan, kuraasta luga-fitsiga leh, miisaska xafladaha, armaajooyinka

**Calaamadaha:**

**HAA:** Ku darista ama bedelida calaamadaha dibadda ee saldhiga barnaamijka

**Nidaamyada rusheeyta (gudaha):**

- **HAA:** Dayactirka/ku rakibidda nidaamka rusheeyaha ama dabka xakamaynta gudaha ee aagga barnaamijka daryeelka caruurta marka uu u baahdo maarshaalka dab-demis – cadayn ayaa loo baahanyahay
- **MAYA:** Meelaha aanu si joogto ah uga faa'iidaysan barnaamijka daryeelka caruurta

**Nidaamyada rusheeyaha (dibadda)**

- **HAA:** si loo ilaaliyo cawska goobta ciyaarta dibadda ee aasaasiga ah ee loogu talagalay barnaamijka xanaanada caruurta oo kaliya hal qeyb oo dayrka ah - fiit laba jibaaran iyo cadayn sawir ee booska xanaanada caruurta ee aasaasiga ah ayaa loo baahan yahay waana in la kala jebiyaa/ lagu qeexaa qiima sheegaha IYO rasiidka. Tani waxay ka dhigan tahay aagga ay carruurtu ku ciyaaraan maalin kasta, agagaarka qalabka ciyaaraha ee is wata.
- **MAYA:** Rakibaadda dayrka oo dhan - xitaa haddii dayrka dhan uu shati u haysto barnaamijka daryeelka carruurta - ama lagu rakibay meel kasta oo dayrka ah oo aan ahayn agagaarka masraxyada.

**Jidadka jaranjarada/Biraha Jaranjarada:**

- **HAA:** Xiritaanka dhabarka tallaabooyinka furan ee loogu baahan yahay dab ka bixid ahaan; ku darista jaranjaro alwaax ah ama tallaabo aan midna ka jirin haddii loogu baahdo badbaadada iyo/ama ka

bixista dabka - cadayn ayaa loo baahan yahay. Ku dar, hagaaji ama beddel biraha gacanta ee gudaha ama derbi geesoodka jaranjarooyinka meesha looga baahan yahay badbaadada - cadayn ayaa loo baahan yahay. Ku dar darbiyo dheeraad ah oo ilaalin ah ama silig darbiga ee sagxada dusheeda haddii aad u kala fogaato koodka shatiga haddii sagxada loo isticmaalo barnaamijka daryeelka carruurta iyo sagxadda ay ka sarreyso 3' dhulka bannaanka ah, una baahan darbi / biraha jaranjarada geesaha ka mara - cadayn ayaa loo baahan yahay.

- **MAYA:** Dayactirka ama dib-u-beddelist darbiyada sagxada/biraha jaranjarada geesaha kamara ama jaranjarooyinka.

**Kaydka Armaajooyinka:**

- Ku daridda kayd alaabta guriga (mid kaligeed ah ama mid lagu dhex dhisay) sida qayb wax lagu kaydiyo, kaydka furan ee ilmuhu isticmaalaan, kayd ka xiran, khaanadaha buugaagta ee loogu talagalay barnaamijka daryeelka caruurta
- **MAYA**: Ma jiraan weel wax lagu kaydiyo, sanduuqyo ama dambiilo, oo ay ku jiraan weelasha loogu talagalay in lagu hayo alaabta gudaha unugyada kaydinta ama iskafaalada alaabta amadharka lagashto

**Daaha qoraxda/ Dalladaha:**

- **MAYA:** oo ay ku jiraan daahyada ku dhisan ee ka dul dhisan dhismooyinka ciyaarta, dalladaha waaweyn, dalladaha miiska, shiraaca albaabka, balbalada, qolalka shaashadaha, teendhooyinka, balbalada xiran/balbalada shaashadaha leh, qolalka qoraxda ama sagxadaha fadhiga.

**Qalabka Gacanta iyo qalabka:**

- **MAYA:** Iibka iyo kiraynta labadaba, oo ay ku jiraan qalabka gacanta iyo/ama qalabka korontada iyo qalabka.

**Jaridda geedka:**

- **HAA:** jaridda geedka iyo/ama burburinta salka-geedka ee agagaarka gudaha garoonka ciyaarta si looga taliyo badbaadada caruurta – cadaynya sawirka ah ee geedka goobta ciyaarta ee looga baahan yahay u-qalmitaanka ama dukumeentiga in ka saarista geed gaar ah looga baahan yahay shati siinta
- **MAYA:** Goynta geedka ama salka geedka meel ka baxsan goobta ciyaarta ee carruurta, geed qurxinta ama jaridda geedaha yaryar/duurka/xayndaabka ama dhirta kale, xataa haddii lagu taliyay ama looga baahan yahay shati bixin

**Casriyeyn:**

- **MAYA:** Casriyeynta bilicda oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn miisaska granite-ka kasamaysan, albaabbada quruxsan (gudaha ama dibadda), beddelka daaqadda caadiga ah ee bow-ga/bay-sha, daaqada qurxinta. Ujeedadu waa in dib loo soo celiyo burburkii uu geystay barnaamijka xanaanada curuurta, iyadoo lagu bedelayo waxyaabaha la midka ah ee la midka ah. Sawirada cadaynaya codsiyada waxaa si xoog leh loogu dhiirigeliyay inay muujiyaan in shayga la codsaday aanu ahayn casriyeyn. Codsiyada noocaan ah waa la diidi karaa cadayn la'aan ama alaab waa la diidi karaa marka warbixinada la is waafajiyo haddii aysan ku caddayn codsiga.

- **Darbiyada/Gidaarada:**
  - **HAA:** Ku darista ama bedelidda darbiyada aan dhawaaqa gudbin

**Dayactirka gidaarka:**

- **HAA:** Dayactirka/beddelka gidaarka qallalan ee burburay, ulaha aan ahayn kuwa haya culayska si loo hagaajiyo burburka goobta barnaamijka daryeelka caruurta
- **MAYA:** Ka saarida gidaarka; derbiyada culayska haya ee dhaqdhaqaaqa; ku daridda dahaarka ee ka dambaysa darbiga

qallalan; mashruuc dhismeed oo u baahan in la gooyo gidaar qallalan sida hawo qaade cusub. Dayactir la'aan gidaarada shubka ah.

**Damaanadaha:**

- **MAYA:** Dammaanada la dheereeyey ama qorshooyinka adeegga

**Daawaynta Daaqadaha/Daaqadda:**

- **HAA:** Dayactirka ama bedelidda daaqad(aha) iyo/ama in bananka dhalo loosameeyo burburka dartiis, ku daridda xariga lagu dajiyo daaha daaqadda ama kan daaha lagu xiro ama aaladaha ee xariga camal loo isticmalo badbaadada caruurta darteed
- **MAYA:** Beddelidda dhammaan daaqadaha xarunta; ku darista ama bedelida daawaynta daaqadaha nooc kastoy tahay (daahyada sida blinds, curtains, drapes, shades, iwm); ku beddelashada daaqadaha balbalada ama ku darida daaqadaha balbalada shaashad gudaha ah

**Dib-u-hagaajinta ceelka/Nidaamka Ceelka biyaha wasakhda galaan:**

- **HAA:** Dayactirka yar ee ceel wasakhaysan sababo caafimaad ama ammaaneed awgood (tusaale ahaan, biyuhu ma dhaafaan shuruudaha shatiga – cadaymo ayaa loo baahan yahay) ama beddelka daboolka ceelasha/ ceelaha biyaha wasakhda ah badbaado darteed
- **MAYA:**
  - Shoog-garaynta/daawaynta ceelaha ee shati-luhu dhihin waa loo baahanyahay
  - Dayactirka waaweyn ama beddelka ceelasha ama ceelasha biyaha wasakhda ah kaydiya (septic system) ama khadadka bulaacada
  - Goobta biyo-baxa
  - faarujinta haamaha bulaacadaha

**Qeybta hoose ee guriga oon la dhammayn**

- **HAA:** Dib-u-dayactirka yar ee qaybta hoose ee loogu talagalay barnaamijka daryeelka caruurta
- **MAYA:** Dhamaystirka / dib-u-dayactirid dhamaystiran; dahaarka ama shaqada dhismaha ee salka ama gudaha derbiyada dibadda.

* Deeqahaan waxaa laga soo qoondeeyay sanduuqa horumarinta xanaanada caruurta ee federaalka, kaas oo mamnuucaya kharashaadka dhismaha cusub ama dayactirka weyn ee xarumaha. Sharci ahaan, dib u dayactir weyn waxaa lagu qeexaa isbedel qaab dhismeedka dhismaha, saqafka, sagxadda, bannaanka ama gidaarada haya culayska ee xarunta, ama kordhinta xarunta si loo kordhiyo sagxadeeda; ama wax ka bedel ballaaran oo lagu sameeyo xarunta sida in si weyn loo beddelo shaqadeeda iyo ujeedkeeda, xitaa haddii dib-u-dayactirid aysan ku jirin wax isbeddel dhisme.

*Mid kasta oo ka mid ah kuwan kor ku xusan sida dib-u-dayactirka guud, dib-u-habaynta yar / hagaajinta qaybta hoose ee dhismaha ama dayactirka yar ee dibadda / dayactirka dibadda waxaw ka koobnaan karaa qayb yar oo beddelaad ah ama dib-u-cusboonaysiinta garaash, dhismaha bannaanka ama xarunta bulshada, oo ay ku jirto laakiin aan ku xaddidnayn kaniisadda, goobta waxbarashada(dugsi), bakhaarka hore, meherad, guri banaan, xarunta bulshada, xarun lagu kulmo(pod), ama xarunta waayeelada.

*****Kharash kasta oo lagu helo **inuu khilaafsan yahay hab-raacyadan** inta lagu jiro warbixinta xisaab-xirka kama dambaysta ah waa la diidi doonaa, qaybta ka midka ah abaalmarinta deeqda ahna waxaa lagu biilgareynaayaa dib-u-bixinta. Fadlan wac/iimayl u dir wixii xaqiijin ah ee loo baahan yahay.

Su'aalaha ama dib u soo noolaynta xarunta aan tixraac u baahnayn, fadlan la xiriir Grants@firstchildrensfinance.org ama wac 612-473-6020

*Liiskan waa la cusboonaysiiyay kadib wareegtada saddexdii biloodba mar si loogu habeeyo codsiyada/mashruucyada cusub – u-qalmitaanka kaas oo ay xaqiijisay DHS. Fadlan dib u eeg liiska la cusboonaysiiyay ka hor inta aanad codsan wareegtada deeqda.*